# Legacy Health, Legacy Health Foundation, & PacificSource

Barnaamijka Dib-u-eegista Foomka A ee Ururka Daryeelka Isku-duwan (Foomka A ee CCO) ayaa dib u eegis ku sameeya heshiisyada ganacsi ee la soo jeediyay ee ku lugta leh ururada daryeelka isku-dubaridan ee Medicaid si loo hubiyo inay kor u qaadaan danaha xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo dhammaan dadka ku nool Oregon, waxayna taageeraan hadafyada Oregon ee sinnaanta caafimaadka, yaraysaa kharashyada daryeelka caafimaadka, kordhisaa helitaanka daryeelka, iyo daryeelka tayada sare leh. Markay ahayd Oktoobar 21, 2024 Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) wuxuu helay gudbinta Foomka A oo sharraxaya qorshayaasha ay Legacy Health ugu wareejinayso saamigeeda ay ku leedahay PacficSource una wareejinayso Legacy Health Foundation.

## Yaa ku lug leh?

**Legacy Health System** (Legacy) waa nidaam caafimaad oo aan macaash-doon ahayn kaasi oo iska leh oo ka hawlgala lix isbitaal oo ku yaala Portland iyo magaalada Vancouver iyo nawaaxigeeda, iyo dooxada bartamaha Willamette. Sidoo kale waxay ku leeyihiin oo ka hawlgalaan 70 ah rugaha caafimaadka ee bukaan-socodka oo ay ku jiraan rugaha daryeelka asaasiga ah, rugaha daryeelka dhakhsaha ah iyo rugaha daryeelka takhasuska ah isla mandaqaddaasi oo dhan. Legacy waxay PacificSource ku leedahay 50%.

**Legacy Health Foundation** (Mu’asasada) waxay hadda taageertaa shaqada Legacy Health iyadoo maalgalisa ururada iyo barnaamijyada bulshada iyo adeegyada kuwaasi oo aysan taageerin lacag-bixinaha soo jireenka ahi.

**PacificSource** waa urur aan macaash-doon ahayn kaasi oo siiya qorshayaasha caafimaadka in ka badan 600,000 oo qof oo jooga Oregon kuwaasi oo leh Medicare Advantage, Medicaid, iyo cayminta ganacsi. PacificSource waxay ka hawlgashaa afar hay'adood oo daryeel oo isku-duwan waxayna ka shaqaysaa Columbia Gorge, Central Oregon, Marion-Polk, iyo aaga adeegga Lane waxayna u adeegtaa aagga metro ee Portland iyadoo qorshe wada shaqayn la leh Health Share of Oregon.

## Wuxuu qorshuhu ku saabsan yahay

Legacy waxay qorshaysay inay u beddesho Ururka mid madaxbannaan una wareejiso Ururka saamiga 50% ee Legacy ku leedahay PacificSource. Ururku wuxuu qorsheeyey inuu gado saamigiisa PacificSource 5-10 sano ee soo socda. Heshiiskan iibku wuxuu la xiriiraa, laakiin uu ka gaar yahay, qorshaha OHSU ee gadashada Legacy.

## Maxaa xiga?

Barnaamijka Dib-u-eegista Foomka A ee CCO ayaa dib u eegis ku samaynaayo heshiiskan si loo fahmo sida ay saameyn ugu yeelan karto xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo dhammaan dadka ku nool Oregon. Inta dib u eegidu socoto, maamulka OHA wuxuu isticmaali doonaa xogta, wararka iyo warbixinada warbaahinta ee daryeelka caafimaadka, macluumaadka laga helo shirkadaha, iyo afkaarta dadweynaha si go’aan looga gaaro bal in heshiiska la ansixiyo iyo in kale. Kadib marka la dhammaystiro

## Dib-u-eegista Foomka A ee Ururka Daryeelka Isku-duwan

dib-u-eegista, maamulka OHA wuxuu soo saari doonaa go'aan khuseeya in heshiisku u socdo sidii loo qorsheeyay iyo in kale. Wax kala ibsigaan ayaa sidoo kale waxaa dib u eegis ku samayn doona barnaamijyada sharciyeynta ee gobolka ee kale.

## Waxaan dooneynaa inaan adiga rayigaaga maqalno!

Aragtida dadweynuhu waxay naga caawisaa fahmidda sida heshiiskan u saameyn karo dadka bulshadaada ka tirsan. Si aad u wadaagto fikradahaaga ku saabsan heshiiskan, fadlan iimeyl u dir CCO.FormA@oha.oregon.gov ama farriin cod ah ugu dhaaf 503-945-5999. Faalladaada, ku xus “PacificSource”, waxaad ka aaminsan tahay, iyo bal haddii aad taageersan yahay ama diidan tahay heshiiska.

Dokumintigaan waxaad ugu heli kartaa luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid si lacag la’aan ah. Nagala soo xiriir iimaylka ee CCO.FormA@oha.oregon.gov ama lambarka taleefoonka 503-945-5999. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.

Haddii aad qabto wax suaalo ah oo ku saabsan warbixintan ama aad jeclaan lahayd inaad codsato xog dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir hcmo.info@odhsoha.oregon.gov.